

COVID-19

Caawimaada Ganacsiga iyo
Macluumaadka wakhtigan



Helidda akhbaartu waynu fahmi karnaa iney muhiimad gaara leedahay. Ka falcelinta hore ee xaaladdan adag ee caabuqa Covid-19, waxaanu u diyaariney ganacstada akhbaar muhiim u ah iyaga. Iyo waliba kuwa raba iney ganacsadayaal noqdaanba. Tani waa hage laguugu talo galay ganacsade adiga, waxaanan kugu dhiirigelineynaa inaad la wadaagto dhammaan cidda aad xidhiidhka uu la leeyahay ganacsigaagu, bulshada aad u adeegtaba iyo cid kasta oo rabta iney hesho macluumadkan. Waxa aan ku rajo weynahay iney idin noqon doonto wax idin anfaca si kasta.

Haddii aad tahay mulkiile ganacsi jira oo ka soo jeeda asal ahaan bulshooyinka qaxoonti ahaan waddankan ku soo galay, waxa aan kugu dhiirigelineynaa inaad ka qeyb qaadato inaad buuxiso tira-koobkan yare e kooban. Tani waxa ay aad u caawin doontaa kooxda halabuurka ganacsiga ee haaya'da ACH iney ka jawaabaan una gargaaraan baahiyaha gaarka ah ee ganacsigiinu qabo sida ugu macquulsan wakhtigan lagu jiro xaalada adag, annaga oo aaminsan in marxalladda caabuqani uu keensadey dhib weyn oo soo daristey dhammaan ganacsiga waddankan, gaar ahaan kuwiina, annaga oo kaga mahadcelineyna inaad ka qeyb qaadato hawshan.

Waxa haayaddu idin diyaarisey qof aqoon iyo xirfad sare u leh halabuurka ganacsiga dadka asalkoodu yahay qaxoonti waddankan soo galay wakhtiyoo kala duwan, taasi oo lagu sameyn doono balan aad ku dalban karto telefoon ama video aad la soo hadleyso. Sidoo kale qeybta xirfadlayaasha la shaqeysaa waxa ay idinka caawin doonaan sidii aad u dalban lahaydeen shaqo iyo waliba iney idinku sii xidhaan goobaha dadka laga shaqaaleysiyo wakhtigan aynu ku jirno. Waxa aad nagala soo xidhiidhi kartaa emailkan cinwaankiisu yahay business. support@ach.org.uk adiga oo fadlan soo raacinaaya qoraal aad ku sheegeyso waxa aad rabto in lagaa caawiyo.

Mahadsanid,

Lydia Samuel

Madaxa halabuurka ganacsiyada ee haayadda

ACH

Wararaka iyo Taageerada ka imanaya Dawladda UK.

Dawladdadhexewaxa ay soo saartey warbixin iyo maculuumaad isku dhafan oo kaalmeynaya, diyaarna xaggooda ka ah, oo laga helaayo websistkooda. Halkan hoose waxa aan idinkula wadaagi doonaa taageeradaasi hadda diyaarka ah. Wuxuu aad ogaataan in tani tahay mid isla beddeli karta xaaladda hadba lagu sugaran yahay sida ay tahay;

The Bounce Back Loan Scheme

Bounce Back Loan waxa ay kaa caawineysaa ganacsiga yar yar iyo kuwa dhexaba sidii ay u amaahan lahaayeen lacag dhan £2,000 ilaa £50,000.

Dawladdu waxa ay damaanad qaadeysaa boqolkiiba boqol in deyntaasi aaney noqon doonin mid yeelata dulsaar dib laga bixinaayo 12 bilood ee ugu horreeya. Deyntaasi waxa ay noqon doontaa mid waarta oo ilaa lix sanno gaadha inad iska bixiso. Tani waxa ay ka dhigan tahay in aan lacag lagaa rabin 12 bilood ee ugu horreeya sannadka. Dawladdu waxa ay si dhaw ula shaqeyn doontaa sidii Isfahan dhaw looga gaadhi lahaa xadiga dulsaarka inta dayntu jirto lagugu yeelan karo.

Cinwaanadda dhaqaalaha kaa taageeraya iyo akhbaarta ku aaddan ganacsiga wakhtigan lagu jiro Caabuqa Coronavirus:

- [Paying your employees](#)
- [Paying sick pay](#)
- [Paying tax](#)
- [Business rates relief](#)
- [Business support grant funds](#)
- [Support for the self-employed](#)
- [Support for small and medium-sized businesses](#)
- [Support for large businesses](#)

Halkan si degdeg ah uga daawo akhbaar ku saabsan Caawimaaddaasi:

- [Overview video for the self-employed](#)
- [Making a Universal Credit claim](#)
- [Facts about furlough](#)
- [Helping employers support employees](#)
- [Running your business through COVID-19](#)

Warbixinno iyo taageerada ay bixinayaan golayaasha Deegaanka hoose ee magaaladaadu

West of England Combined Authority (WECA)

WECA waxa ay kaa caawin doontaa iney kugu hagto taageero uu ganacsigaagu u baahan yahay iyo adiguba haddii aad deggen tahay magaalada Bristol, Bath, North East Somerest iyo South Gloucestershire. [**Fadlan guji halkan**](#) si aad u hesho maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan WECA

WECA waxqabadkeeda, ee Future Bright waxa ay kuu haysaa tobabarro bilaash ah iyo taageero iyo caawimaad joogta ah inay ku horumariso xirfadaada iyo kalsoonidada aad ku horumarin lahayd inaad ku gaadho guusha aad higsaneyso. Marka aad ku soo biirto Future Bright waxa lagu asteyn doonaa tobabare adiga kuu gaara oo kaa cawin doona sidii aad u sameysan lahayd qorshe hawleed adiga ku gaara. Si loo caawiyo dadka ganacsigooga iyo dhaqaalahooduba uu saameyey xanuunka Covid-19, waxa muhiim ah iney buuxin karaan shuruudaha looga baahan yahay si ay u helaan taageeradaasi. Si arrintaasi u hubiso fadlan warbix-

in intan ka faahfaahsan ka eeg [**Future Bright.**](#)

Gollaha deegaanka magaalada Bristol

Gollaha deegaanka ee magaalada Bristol waxa uu kuu hayaa hage kaa caawinaaya oo diyaar ah ganacsigaga iyo adigaba, taasi oo aad ka heli karto xafisiyadooda iyo ururada la shaqeeyaba. Si aad maclummaad intan ka faahfaahsan u hesho fadlan booqo websitkan hoose ee aan kugu lifaaqney qoraalkan, oo aad ka heli doonto maclummaad badan oo ku saabsan sidii aad u heli lahayd, deyn, taageero dhaqaale, iyo sixir dhimisba oo caawin doona ganacsigaaga, iyo sidii aad u dhammeystiri lahayd xog urursiga ku saabsan sidii loo heli lahaa ganacsiyada uu saameyey xanuunka COVID-19 ee xaaladdan aynu hadda ku jirno si loo ogaado. [**Bristol City Council COVID-19 information and support businesses.**](#)

Bath and North East Somerset

Bath iyo North East Somerset waxa ay

soo bandhiggeen qoraallo badan oo ganacsiga iyo mid gaaraba ah oo kuu sahlaaya inaad ka hesho caawimaad iyo hagid ku saabsan xaaladdan adag ee xanuunkan Covid-19. Taaasi oo ah maalgelin dhaqaale oo taageereysa ganacsigaaga iyo adeegga aad haysaba marxaladdan lagu jiro. Halkan hoose waxa aad ka heli kartaa macluumaaad faahfaahsan oo ku sahlaaya inaad hesho warar ku saabsan dhaqaale helid iyo taageeraba. [**Coronavirus - latest information and advice.**](#)

South Gloucestershire Council

Gollaha deegaanka South Gloucestershire waxa uu hayaa warbixino iyo warar badan oo ku saabsan xaaladda isbed-deshay ee dhinaca ganacsiga, shaqaa-laха iyo xirfadlayaashaba oo aad ka heli karto websitkooda warbixinadaasi oo faahfaahsan. Halkan hoose waxa aad ka heli kartaa warbixinadii ugu dambeeyey sida aad u dalban karto dhaqaalaha iyo caawibaada ay bixiyaanba.

[**South Gloucestershire Council information.**](#) Ama waxa aad ka wici kartaa telefoonkan hoose 01454 868002.

Ururada Kuu dhow ee aad ka heli karto Caawimaada

Business West

Business West waa haayad aan macaash doon ahayn oo taageerta, jecelna in ganacsiga galbeedka ingiriis-ku noqdo ka ugu fiican ee loogu jecel yahay in aad u shaqeyso ama ku noolaato. Wuxuu ay siiyaan ganacsiga dee-gaankan taageero weyn. Waxqabkooda ku aaddan ama saleysan xaaladdan uu jiro xanuunka Coronavirus-ku waxa ay si wacan u taageeraan ganacsiyada si ay u siiyaan talooyin wax ku ool ah oo ay ka heli karaan websitkooda xaaladan adage e lagu jiro. Halkan hoose kala soco si aad u aragto macluumaadkaasi.

Trading through coronavirus.

Outset

YTKO's Outset adeeggeeda cusubi waxa ay daahfureen mashruuc lagu taageeraayo ganacsatada yaryar ee uu magaalada Bristol ee uu saameyey Covid-19. Ka falcelinta baahiyaha ay qabaan ganacsiyada ay leeyihii bulshooyinku iyo la isla jaanqaadsiinta nidaamka cusub ee ay soo diyaarisey dawladdu ee lagula dhaqmaayo. Adeegani waxa uu socon doonaa si loogu horumariyo loona gaadhsiyo ilaa dhammaadka bisha Lixaad ee sannadkan. Maamulayaasha

ganacsatayaashu waxa ay la xidhiidhi karaan hawl wadeennada hawshan iyaga oo marka hore u diraaya telefoon, uu ka caawin doona qof khabiir ku ah la talintu. Taasi oo ay marka xigtana daba socon doonto tobbabarro iyo taageero la siin doono si gaara shaqaalahooda, taasi oo laga caawin doono dhinaca helidda iyo maamulida dhaqaalaha oo ay ku jirto dhaqaalaha dawladdu ugu talogashay, halabuurka iyo soo bandhigidda baahiyahooda, maamulidda isbeddalada ay ku dhisayaan sidii ay u waari lahaayeen xaaladdan lagu jiro. Mashruucani waxa uu u sahlayaa dhammaan ka qeybagalayaasha iney si bilaash ah u helaan sidii ay ugu horumarin lahaayeen aqoontooda ku dhisan qaab online ah. Si aad u hesho macluumaadka ay kuu diyaariyeen khuburradaasi si aad ugu shaqeyso ugana faa'iideysato wakhtigaaga kala xidhiidh halkan hoose oo aad ka heli doonto macluumaad dheeraad ah oo intan ka faahfaahsan.

[outset.org/bristolcovidresponse.](http://outset.org/bristolcovidresponse)

Ama wac telefoonka
0800 917 9324
Email:
bristolcovidresponse@outset.org

BRAVE

Ganacsiga Brave waxa uu ka mid ahaa kuwa faro-ku tirsiga ah ee wakhti fog laga aasaasey magaalada Bristol ee bixiya talooyinka ku aaddan ganacsiga yaryar. Taasi oo si guud iyo si gaaraba u caawiya sidii ay u heli lahaayeen talooyin wax ku ool ah, tobarro iyo la talin dad badan oo gaadha Kumaakun sannadkii. Kuwaasi oo ay ka caawiyaan sidii ay u bilaabi lahaayeen, una maamuli lahaayeen ganacsi guuleysta, oo laga macasho faa'iido. Haddaba Brave waa la xidhay xafiiskeedii xaaladdan adag ee Covid-19 ka ee la galay awgeed, balse waxa ay talooyinkii ka bixiyaan qaab online ah, adiga oo telefoonkooda ama emailkooda kala xidhiidhaya.

BRAVE information

Natwest Business Builder

Pre-accelerator duruustii ay bixin jireen waxa laga beddalay magacii. Wuxaan laga dhigey hadda "Kuwa dhisa ganacsiga". Tani waa duruus qaab digital ah lagu dhigto. Hadda waxa ay bixiyaan ilaa 14 xidhmo cashar oo dhammaadtood xoogga saara sidii loo horumarin lahaa waaraanka ganacsiga. Tani waa mid ku fiican halabuurka ganacsiga marxaladda hore, ama halabuurrada ganacsi ee ka fikiraaya sidii ay qaab-dhismeedka ganacsigooda dib u qaabeeyn lahaayeen. Dhammaan duruustaasi waxa ay ku baxaan qaab online ah,

waxaana dhaqaale ahaan ka taageera bangiga Netewst, haddii aad booqato waxaad ka heli doontaa macluumad intan ka badan.

Natwest Business Builder Programme.

SETsquared

SETsquared Bristol waxa ay fahansan yihiin iney xaalad adag oo kakani ay soo foodsaartey ganacsiga dadka aan caddaanka ahayni ay leeyihiin ama maamulaan. Tani waa sababta SETsquared Bristol oo kaashaneysa haayadaha ACH iyo Up Our Street u fulin doonaan cilmi baadhis ku saabsan, waxa ay yihiin caqabadaha ka hor yimaadda ganacsiga ay maamulaan bulshooyinka laga tirade badan yahay ee Madawga, Eeshiyaanka, iyo sidii ay fursad ugu heli lahayeen aasaaska halabuurka ganacsi ee cusub. Halkan ka eeg warbixin faahfaahsan.

Read the report here.

Markii hore iyo haddaba waxa ay ka caawin jirety iney soo bandhigto cilmbaadhisyo ay daahdureen oo lagu horumaraayo ganacsiyadaasi aan soo xusay. Tani waxa ay mar kale fursad u siineysaa in mashruucyadaasi codsiyadooda dib loo furi doono sannadkan, si loogu caawiyo BAME ganacsyiadooda.

Breakthrough Bursary here.

School for Social Entrepreneurs (SSE)

SSE waxa shaqaaleysiiyey Bangiga Lloyd qeybtiiisa Trade UP programme ee koonfurta Bristol. Waa furan yihiin codsiyadu ilaa inta laga gaadhaayo 30-ka bishan April, taasi oo uu bilaabmaayo mashruucu bisha Octoober ee 2020-ka. Tani waa mid loogu talo galay xaalada hore ee ganacsiga yaryar, ganacsiga bulshooyinka, ururada gargaarka iyo waliba ururada VCSE-ga. Kuwaasi oo raadinaaya caawimaad si ay uga soo kabtaan xaaladda adag ee uu galay ganacsigoodu ee uu sababey xanuunka Covid-19. Si ay uga dhigaan ganacsigooda kuwa sii waara, jira oo oo horumara ama kora, si ay u sii joogteeyaan ganacsigoodii ay ka heli jireen dhaqalaha soo gala. Tani waxa kale oo ay fursad u siineysaa dhammaan ganacsiga koonfurta Bristol iney ka faa'iideystaan fursaddan ay ku dalban karaan dhaqalahsan ku jira mashruucan oo laga filikaraayo in laga helo lacag gaadhsisan inaa £4000, oo ay ku jirto waxbarasho bilaash ah, iyo hagid iyo tobbabaro ay ka helayaan bangiga Lloyds. dhammaan macluumaadkani waxa laga helayaan isaga oo qaab online ah websitkan hoose. [can be found here.](#)

Princes Trust

Prince's Trust waa urur mutadawacnimo ah oo loo aasaasey inuu caawiyo dadka yaryar ee Aadka u nugul ee aan shaqeyn Karin. Waxa uu caawiyaa da'da

u dhaxeysa 11 ilaa 30 jirka ee ay hayso shaqo la'aantu ee aan dhammeysan waxbarashada ee ay dhici karto iney ku jiraan xaalada khatar ku ah. Waxa ay u diyaariyaan taageero ah iney u furaan ganacsi cusub, ama ay la raadiyaan inuu shaqo helo, iyaga oo ka caawiyo sidii ay u dhisi lahaayeen kalsoonidiisa. Princes Trust waxa kale oo uu diyaariyeey taageero iyo qorshayaal lagu caawinaayo xaaladdan lagu jiro ee uu sababey xanuunka Covid-19 si toos ah oo aad u heleyso caawimaad qaab online chat. [Princes Trust live chat.](#)

Waxa ay sidoo kale ka shaqeeyaan galbeedka waddankan England iyaga oo sii wada sidii ay isku fidin lahaayeen sidii waxqabadkoodu u taageeri lahaa ganacsiyda iyaga oo bixinaaya casharro muuqaal ah oo ay ku bixinayaan gaar ahaan dadka ka yar 30 jirka, iyaga oo qaabka loo yaqaan Microsoft Team adeegsanaaya. Intaa ka dib qof kasta oo dhammeysta casharradaasi waxa uu helayaan taageero dhaqaale iyo inuu ka qeyb ahaado mashruucyada la wado. Si kastaba ha ahaatee arrimahan oo dhammi waa kuwa u dhaacaya qaab muuqaal online ah iyo telefoon-ba. Fadlan booqo websitkooda si aad uga hesho macluumaad ka faahfaahsan intan

<https://www.princes-trust.org.uk/>.

Black South West Network (BSWN)

BSWN waa urur hoggaamiya bulshooyinka laga tirada badan yahay ee Madowga, Eeshiyaanka (Black and Asian Minority Ethnic (BAME)) kaas oo u dooda taaageera na sinnaanta iyo caddaaladda dhinaca shaqadda iyo ganacsiga ba ee dadkaasi. Wuxuu hoggaamiyaa tira-koobka cilmi-baadhisseed ee lagu ogaanaayo saameynta iyo arrimaha ku saabsan ganacsiga bulshooyinkaasi, iyo sidii ay codkooda kor ugu qaadi lahaayeen iyo saameynta ay leeyihiiin ba kuwaas oo la geynaayo ama loo marayo hab ku dhisan dood cilmiyaysan oo lagu qancinayo dadka ay taladu ka go'do. Si tani u hirgasho oo loo xoojiyo xidhiidhka iyo iskaashiga ka dhaxeeya horumarinta iyo sinaanta ku dhisan cadaaladda ee bulshooyinkan, waa in laga shaqeysiyo sidii loo riixi lahaa ama garaaci lahaa albaab kasta oo awood leh, oo u baahan in codkaasi gaadho. Sidaa darteed waxa ay abuuraan mashaariic ku dhisan in ay u fududeyaan bulshooyinka BAME sidii ay uga qeyb qaadan lahaayeen horumarka socda ee lagu taageerayo ganacsigooda. BSWN waxa ay gancisyadaasi siisaa taageero dhinac kasta ah oo ay u marinayso qaab online ah, iyo waliba tababaro dhinaca muuqaalka ah. Si haddaba aad macluumaaadkasi u hesho booqo halkan hoose ama guji.

Webinars and online training

National Business Support Organisations

New Enterprise Allowance (NEA)

Tani waa dhaqaale ay dawladdu ugu talo gashay inaad ku hesho taageero, caawimaad lagugu siinaayo dhaqaale si lagaga taageero sidii aad u abuuri lahayd ganacsi aad adigu leedahay, taasi oo lagaa kaalmeynaayo. Si aad macluummaad intan ka faahfaahsan u hesho booqo halkan hoose ama guji NEA Campaign Video.

Si aad u hesho taageeradan waad inaad ka weyn tahay da' ahaan 18 jir am tahay.

- Waa in adiga ama lamaanahaagu ay qaataan dhaqaalaha dadka lagu caawiyo ee kala ah Universal Credit, Jobseeker's Allowance or Employment and Support Allowance
- Waa inaad heshaa ama lagu siiyo cawimaad dhaqaale ama deynta dhaqaale waalidka, ama xanuunnda lagu qaato ama baahiyaha gaarka ah dadka qaba
- Wuxaad heli doontaa caawiye kaa kaalmeyn doona sidii aad u abuuran lahayd ganacsigaaga ama ti-jaaradaada. Marka aad sameysato qorshe hawleedka lagu yagleelaayo ganacsigaaga, waxa qofka ku caawinayaam taageeraya kuu ogolaan doonaa sidan;

- Inaad hesho dhaqaale usbuucii kuu yimaadda oo dhan £1,274 ilaa 26 usbuuc
- Iyo inaad deyn qaadan karto si aad ugu taageerto ganacsigaga bilawga ah kharashkiisa

Waxa aad la hadli kartaa si aad macluummaad faahfaahsan u hesho Jobcenter-kaaga qofka kaaliyaha ka ah ama booqo halkan hoose;

<https://www.gov.uk/contact-jobcentre-plus>

£££ The Princes Trust and Natwest Enterprise Relief Fund

Dhaqaale caddadkiisu yahay ilaa £5 Milyan ayaa loo diyaariyey ganacsadaayaasha ay u dhaxeyso 18 ilaa 30 Jir, si loogu caawiyo iney kula tacaalaan dhibaatooyinka uu ganacsigooda ku keeney xanuunka Coronavirus-ku. Ganacsiyada heli kara dhaqalahsan waxa shardi ah iney shaqeynaayeen wax ka yar afartii sanno ee ugu dambeeyey, iyo waliba inaaney helin dhaqaale kale inta xaaladda xanuunkan lagu jirey. Si aad macluummaad dheeraad ah uga hesho fadlan iska diwaangeli halkan hoose haddii aad xiiseyneyo.

[Enterprise Relief Fund](#)

Enterprise Nation

Ganacsiga qaranku waa mid u adeega qaranka guud ahaan kaasi oo caawiya ama ku haga ganacsiga inuu siiyo talo dhammaantii, kuwa UK oo dhan. Waxa ay hadda si toos ah u bixiyaan talooyin ku aaddan xanuunkan COVID-19 dhibaatooyinkiisa iyaga oo u qabta adeeg bilaash ah oo ay ka heli kartaan maqal iyo muuqaal ah. Haddaba si aad u hesho talooyinkaasi fadlan booqo halkan hoose;

Enterprise Nation coronavirus support.

£££ British Business Bank

Bangiga ganacsiga Ingiriisku waxa uu bixinayaa deyn uu siinaayo ganacsataada Ingiriiska. Deyntani waxa dabada ka riixaaya in la siiyo ganacsiyada daw-ladda, oo ugu talogashay inuu diyaar u ahaado ganacsiga uu saameyey ama saameyn karo xanuunka Coronaviriska, taasi oo hadda diyaar u ah ganacsataada.

Dhaqaalahani waxa uu ka kooban yahay afartan deeqbixiyayaal oo siin doona deyn xaddigeedu leeg yahay in aa£5,000,000 oo deyn ku noqon doonta ganacsiyada iney dib iskaga soo bixin doonaan. Kuwani malaha nidaamka Islaamiga ah ee shareecadu la waa-fajinaayo. Sidaadarteed, waxa aan kula talineynaa in aan tixgelin doono arrintaasi in la sameeyo mustaqbalka. Si

aad u hesho macluumaad dheeraad ah fadlan booqo ama guji halkan hoose;

For more information click on the link below.

Federation of Small Businesses (FSB)

FSB waa urur ganacsato oo UK ah, waxaaney mataalaan dhammaan ganacsiyada yar-yar ama dhexeba. Iyaga oo kaashanaaya cidaha ay wada shaqeeyaan waxa ay bixiyaan talooyin, taageero, iyo caawimaadba. FSB waxa kale oo ay ganacsiga yaryar u soo bandhigaan arrimo ama meelo badan oo ay ka heli karaan akhbaar caawineysa sidii ganacsigoodu u heli lahaa talooyin iyo taageero wax ku ool ah, oo ay ku il-aalinayaan ganacsigooda iyo shaqaala-hoodaba.

Waxa ka mid ah iney bixiyaan kuwan hosoe oo kale;

- **Latest news**
- **Free Webinar**
- **What help is there?**
- **What if I employ Staff?**
- **Looking after your mental health**

Support for Charities and Social Impact Projects

Dawladdu waxa ay shaacisey in lacag dhan £750 Milyan ay diyaar u yihiin dhammaan haayadaha ka shaqeeya gargaarka iyo taageeradu si ay ugu adeegaan dadka aadka ugu baahan ee baa-hiyaha gaarka ah qaba, iyo waliba in lagu taageero dhammaan cid kasta oo uu saameeyo xan-uunkan dhibka badan ee Covid-19. Dhaqaalahan waxa loo qey-bin doonaa dhammaan qeybaha dawliga ah iyo waliba haayadaha gargaarka ee bulshooyinka bakhtiyaanasiibka ah dhaqaale lagu taageero waliba. Fursadahani waxa ay furmi doonaan dha-waan usbuucyadan. Ka eeg hal-kan hoose warbixin dheeraad ah;

[Click here for more information.](#)

School for Social Entrepreneurs (SSE)

SSE waxa ay caawineysaa ilaa 1,000 qof sannadka hore si loogu horumariyo xirfadooda, kartidooda, iyo xidhiidh-dooda ganacyada si ay ula tacaalaan

xaaladaha adage ee bulsho ahaan dhibaataada weyn ku noqda. SSEwaxa kale oo ay waddaa casharro lagu horumari-naayo ama taageeraayo sidii aad u bilaabi lahayd, u qiimeyn lahayd una horumarin lahayd urur sameeyo tusaale fiican oo lagu daydo oo keeni kara isbeddal miisaan leh bulshada dhex-deeda. SSE maaha dugsi si caadi ah u shaqeeya, waa dugsi dhiirigeliya sidii loo heli lahaa aqoon ficol ku dhisan. SSE waxa kale oo ay dadka u taageertaa siyaalo kala duwan, tusaale ahaan iney dhaqaale siiso, ama tobabar xirfadeed. Dugsiga xirfadaa ganacsigu ee bulshadu waxa uu wali bixiyaa tobabarro iyo tilmaamo uu siinaayo ganacsyaadka bulshada ee ay saameysay xaaladdan adag ee lagu jiro ee uu sababey xanuunka Covid-19, si qaab online ah. Fadlan haddii aad rabto macluumaad ama war intan ka faahfaahsan fadlan noo sheeg sida laguu caawin karo.

[Click the link below to see how they can help you.](#)

£££ Big Society Capital

Big Society Capital waxa ay caawisaa si ay u horumariso shaqsiyaadka ku nool waddankan UK iyaga oo ka taageeraya dhinacyo badan oo mashaariic ah. Waxa ay la shaqeeyaan tiro iskaashato

ganacsi oo lagu caawiyo dhaqaale kala duwan oo sababa sidii lagu sameyn lahaa isbeddal tayo leh. Halkan hoose waxa aad ka heli doontaa inaad ka hesho fursadahaasi ganacsi ee ay bixineyso haayadani iyo waliba iskaashatadoodu.

<https://www.goodfinance.org.uk/latest/post/coronavirus-post/funding-and-investment-guidance>

Social Enterprise UK

Ganacsiyada bulsho ee Membership Body waa ganacsiyo bulsheed oo ah kuwa UK ugu xidhidhada iyo xubnaha badan ee ay ka midka yihiin dhammaan urur bulsheedyada ay hoggaamiyaan ganacsiyada dawladda ee adduunka ku kala filiqsan. Wuxuu xubno ka ah dhammaan ururro badan, taasi oo laga helaayo warbixino iyo macluumaad dheeraad oo cusub oo la xidhiidha xanuunka Coronavirus-ka ganacsiga laga taageeraayo ee uu saamyey si joogta ah. Si aad ula socoto, waa inaad mar walba ku xidhnaataa si joogta ah macluumaadkooda, adiga oo ka heli doona websit-kooda war intan ka faahfaahan.

Coronavirus Support and Resources

£££ SASC

Kooxdan la yidhaahdo “Social and Sustainable Capital” waxa ay maalgaliyaan iskaashatada ururada ka midka ah iya-

ga oo ka caawiya sidii ay xal waara ugu raadin lahaayeen caqabadaha ka hor yimaadda ganacsiga bulshooyinka. Codsiyada lagu dalban karo dhaqaale ee ay ku taageeraan waxa la furey badhtamihii bishan April taasi oo deyn ay bixinaayn ay u kala qeybiyeen ilaa bisha May. Daymahani waa kuwa aan laheyn dulsaar iyo lacag lagu galaayo 12 billood ee u horreeya. Halkan hoose kala deg ama ka eeg warbixin dheeraad ah oo arrintaasi sharxaysa.

<https://www.socialandsustainable.com/news/sasc-support-new-£25m-resilience-and-recovery-loan-fund-third-sector>

ACH

www.ach.org.uk